GOBOLKA WASHINGTON

XAFIISKA DACWAD DHAGEYSIGA MAAMULKA

Racfaanka Caymiska Shaqo la'aanta

# Sida La Isugu Diyaariyo Dacwad Dhageysigaaga Shaqo La'aanta

Su'aalo miyaa qabtaa? Turjubaan miyaad u baahan tahay?

Wac (800) 366-0955

***Yaa dhageysan doona oo go'aamin doona racfaankayga?***
Marka qof ama ganacsi ay ku khilaafaan go'aanka ay gaarto Waaxda Amniga Sugida Shaqada (Employment Security Department, ESD), Xafiiska Dacwad Dhageysiga Maamulka (the Office of Administrative Hearings, OAH) ayaa dhageysan doona oo go'aan ka gaari doona khilaafka. Garsooraha dhagaysanaya dacwadaada waa dhexdhexaad mana aysan shaqaaleysiinin ESD.

***Sideen uga qayb qaadanayaa dacwad dhageysigayga?***
Taleefoon ahaan Waa inaad wacdaa si aad uga qaybgasho.
Waxa aad raacdaa tilmaamaha ku qoran dukumeentiga Ogeysiiska Dacwad Dhagaysiga.

***Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo Turjumaan?***
Dacwad dhageysiga iyo go'aamada waxaa lagu bixin doonaa iyagoo Af-Ingiriis ah. Haddii adiga ama mid ka mid ah markhaatiyaashaada u baahan tihiin turjumaan, fadlan kala xidhiidh OAH lambarka (800) 366-0955 sida ugu dhakhsaha badan. Saaxiibada iyo xubnaha qoysku uma turjumi karaan qolo ama markhaati.

***Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo wax horay u sii qabanqaabinta dadyowga naafada ah?***
Haddii aad u baahan tahay wax horay u sii qabanqaabin, fadlan kala xidhiidh OAH lambarka (800) 366-0955 sida ugu dhakhsaha badan.

***Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo in aan dib u jadwaleeyo dacwad dhegeysigayga?***
Haddii aad u baahan tahay inaad beddesho taariikhda ama wakhtiga dacwad dhegaysigaaga, ka wac OAH lambarka **(800) 366-0955** sida ugu dhakhsaha badan.
Garsoore ayaa dib u eegi doona codsigaaga. Garsooraha ayaa laga yaabaa inuu ku soo waco si uu kuu weydiiyo sababta aad u rabto in taariikhda dacwad dhegeysiga la beddelo.
Taariikhda dacwad dhegeysiga ayaa kaliya waa laga bedeli doonaa haddii aad haysato sabab wanaagsan. Garsooraha ayaa go'aamin doona haddii taariikhda ama wakhtiga la bedeli karo. Weli waxaad u baahan doontaa inaad timaado oo aad u diyaargarowdo dacwad dhageysigaaga haddii aysan ka ahayn in laguu sheego in taariikhda la beddelay ma ahanee.

***Maxaa dhacaya haddii aanan sii rabin in aan racfaan ka qaato go'aanka?***
Haddii aadan u sii baahnayn dacwad dhageysi, waxaad la noqon kartaa racfaankaaga. Si aad uga noqoto racfaankaaga, farriin u dir ama wac OAH, ama u sheeg garsooraha wakhtigaaga dacwad dhageysiga. Haddii aad ka noqoto racfaankaaga, go'aanka ESD ee kiiskan wuxuu noqonayaa kan ah KAMA DANBEYSTA. Ma awoodi doontid inaad rafcaan ka qaadato mustaqbalka. Waxaad ka codsan kartaa inaad ka noqoto racfaankaaga onlayn adigoo adeegsanaya cinwaankan:
oah.wa.gov/Content-Area-Management/Forms-Hub/Withdrawal-Unemployment-Insurance

**U diyaar garowga Dacwad dhageysiga**
Xuquuqdaada ayaa saami ka ah gudaha rafcaankan. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad kiiskaaga u gudbiso garsooraha. Waxaad u baahan doontaa inaad is-diyaariso.

1. Akhri Ogeysiiska Dacwad Dhageysiga

2. Xusuus-qor ka sameyso taariikhda iyo wakhtiga dacwad dhageysiga si aadan u iloobin inaad ka qeybgasho.

3. Si taxadar leh u akhri xidhmada dukumeentiyada taageeraya. Dukumeentiyada taageeraya kiisku waa dukumeentiyada la xidhiidha xaqiiqooyinka kiiskaaga. Waxay ka bilaabmaan warqadda go'aaminta ee aad rafcaanka ku qaadatay, siddeed ilaa toban bog oo ka mid ah xidhmadaada dacwad dhegeysiga, waxayna sii socdaan ilaa dhammaadka xidhmada.
   **Xaqiiji inaad haysatid dukumeentiyadan inta lagu jiro wakhtiga dacwad dhageysiga**.

4. Ma jiraan dukumeenti dheeraad ah oo aad haysatid oo ka caawin doona garsooraha inuu fahmo xaqiiqooyinka muhiimka ah ee kiiska?
   Hadday sidaas tahay, eeg tilmaamaha hoose ee ku saabsan "Soo Gudbinta Dukumeentiyada."

5. Waxaad markhaati ku heysan kartaa goobta dacwad dhegeysigaaga. Marqaatigu waa qof si toos ah u yaqaan xaqiiqda aad rabto in garsooruhu ogaado.

   U sheeg markhaatiyaashaada taariikhda, wakhtiga, lambarka taleefanka, iyo koodhka gelitaanka ee ka socda Ogeysiiska Dacwad Dhageysiga si ay u soo wacaan dacwad dhegeysiga

## Soo Gudbinta Dukumeentiyada (Dukumeentiyada Taageerada)

Garsooruhu waxa uu marin u heli karaa oo keliya xidhmada dukumeentiyada taageerada iyo dukumeenti kasta oo kale oo loogu soo diro OAH sabab ah dacwad dhegeysiga.

Haddii aad hayso dukumeentiyo dheeraad ah oo aad rabto in garsooruhu arko, waa inaad isla markiiba u dirtaa OAH **iyo dhammaan dhinacyada kale ee ku taxan dukumeentiga Ogeysiiska Dacwad Dhageysiga**.

Ku soo gudbi dukumentiyada:

- Websaydhka: Ku soo rar dukumeentiyada kiiskaaga Bogga Interneetka ee Ka qaybqaataha (ka eeg tilmaamaha sanduuqa).
- Boostada: 16201 E. Indiana Avenue, Suite 3000
  Spokane Valley, WA 99216
- Fakiska: (509) 456-3980

**Xaddidaadaha cabbirka faylka**. Dukumeentiyada la soo galiyo Bogga Interneetka ee Ka qaybqaataha waxa laga yaabaa in aanay dhaafin 1 gigabyte faylkiiba. Faylasha elegtarooniga ah ee loo soo diro OAH (memoriga falaashka ee USB-ga) waxa laga yaabaa in aanay dhaafin 2 gigabytes faylkiiba.

Ku soo gudbi dukumeentiyada taageerada ah ee **muuqaal ahaanta ah ama kuwa maqal ahaanta ah** onlayn ahaan adigoo u soo maraayo Bogga Interneetka ee Ka-qaybgalaha OAH ama boosto ahaan wixii ah CD, DVD, ama memoriga suulka la dhan (kuwan LAGUUMA soo celin doono). Nooca faylka waa inuu noqdaa MP3 ama MP4.

**Ha sugin inaad soo gudbiso dukumeentiyadaada taageerada**. U soo gudbi OAH iyo dhammaan dhinacyada kale in ka badan laba maalmood oo shaqo (48 saacadood, marka laga reebo maalmaha fasaxa toddobaadka iyo fasaxyada caadiga ah) ka hor dacwad dhegeysigaaga.

**OAH kuuguma diri doonto dukumeentiyada dhinacyada kale iyadoo adiga ku mataleysa. Waa inaad adigu sameysataa sidaas.** Haddii dukumeentiyadaada aan wakhti horeba loogu soo gudbin OAH iyo dhinacyada kaleba, waxaa laga yaabaa in dukumeentiyadaada aan la tixgelinin.

### Isticmaalka Bogga Intarneerka ee Ka qaybqaataha ee OAH

Waxaad ka booqan kartaa websaydka OAH barta www.oah.wa.gov si aad u hesho marin u hel elegtaroonigeed kiiskaaga. Waxaad isticmaali kartaa bogga intarneetka si aad u soo gudbiso dukumeentiyada aad rabto in garsooruhu arko iyo inaad akhrido dukumeentiyada ku jira gal dacwadeedkaaga ka hor wakhtiga dacwad dhageysiga. Ma heli doontid ogeysiis marka dukumentiyada lagu soo daro faylka.

Tilmaamaha lagu sameenayo akoon oona marin aad ugu heli karto kiiskaaga waxay ku yaalaan bogga hore ee jaldiga ee xirmadaada dacwad dhegeysiga. Haddii ay dhibaato kaa qabsato websaydka ama ku soo shubida dukumentiyada, wac **(800) 366-0955** si aad u hesho caawimo.

> ⚠ Ka saar macluumaadka qarsoodiga ah (sida nambarada lambarada Soshal Sekuritiga, lambarada akoontiga bangiyada, iyo lambarada shatiga darawalnimada) ka hor inta aadan dukumentiyada u soo dirin OAH iyo dhinacyada



ESD NOH – Teams| Reviewed 6/5/2025 | Translated 6/2025

**Baadhista Kiiskaaga**

Haddii aad xiisaynayso inaad baaris ku sameyso sharciyada ku dabaqmayaan kiiskaaga, Xeerka Dib loo eegay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) iyo Xeerka Maamulka Washington (Washington Administrative Code, WAC) ayaa laga heli karaa barta www.oah.wa.gov.

Buug-gacmeedka ESD ee loogu talagalay Shaqaalaha Shaqo la'aanta ah ayaa bixiya macluumaadka ku saabsan helitaanka dheefaha. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad fahanto macluumaadka ku jira Buug-gacmeedka. Waxaan kuu soo jeedinaynaa inaad akhrido Buug-gacmeedka ka hor dacwad dhegeysigaaga

Buug-gacmeedka ESD waxa laga heli karaa gudaha websaydka ESD. Websaydhka ESD waxaa lagu heli karaa isagoo ku qoran Af-Isbaanish wuxuuna ku hayaa xoogaa macluumaad 16 luqadood oo kale ah. Ka wac ESD lambarka 1-800-318-6022 haddii aad u baahan tahay turjubaan bilaash ah ama aad su'aalo qabto.

## Maxaa Ka Dhacaya Goobta Dacwad Dhageysiga?

Dacwad dhageysigaagu wuxuu qaadan karaa ilaa laba saacadood, inkastoo laga yaabo inay ka gaabnaato muddadaas. Dacwad dhegeysiyada leh rafcaannada, markhaatiyada, ama turjubaanada badan guud ahaan waxay qaataan waqti ka badan dacwad dhegeysiyada kale.

**Waa iney kuu sugnaato meel degan iyo khad telefoon oo wanaagsan. Qaylada nawaaxiga ka imaata ayaa faragelin kartaa duubista dacwad dhageysiga. Waa inaad isticmaashaa kaliya sameecada talefoonka ama dhego-gashiga Bluutuukhka lagu xidiidhiyo haddii aad xaqiijineyso in tayada codku uu wanaagsan yahay oo aana la dhalan-rogin.**

Marka dacwad dhageysigu bilaabmo, garsooraha ayaa sharxi doona kiiska iyo habka dacwad dhageysiga. Garsooruhu wuxuu waydiin doonaa qof walba inuu is-cadeeyo/is-sheego qofka uu yahay. Dacwad dhageysiga waa la duubi doonaa.

Garsooraha ayaa go'aamin doona goorta uu qof walba uu hadli doono. Garsooruhu wuxuu weydiin doonaa su'aalo (hoos ka eeg) wuxuuna sharxi doonaa cidda kale ee fursad u heli doonta inay su'aalo ku weydiiso inta lagu jiro wakhtiga dacwad dhegeysiga.

Dhammaan dhinacyadu waxay heli doonaan fursad ay ku sheegaan sheekada side ay ka tahay dhinacooda.

Garsooruhu wuxuu soo saari doonaa go'aan qoraal ah oo ku salaysan markhaatifurka iyo dukumentiyada. Go'aanka waa la soo shubi doonaa

Bogga Intarneetka ee Ka qaybqaataha. Waxaad dooran kartaa inaad go'aanka ku hesho boostada.

Dacwad dhagaysigu waa fursadaada kaliya ee aad ku sheegi karto sheekadaada oo aadna wadaagi karto dukumentiyadaada. Haddii aad codsatay dacwad dhageysiga laakiin aadan ka qeybgalin, codsigaaga dacwad dhageysi waa la tuurayaa go'aanka ESD-na wuu sii jiri doonaa.

Haddii aadan ku raacsaneyn go'aanka garsoorka, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato Xafiiska Dib-u-eegida ee Komishoneerka ee ESD. Go'aanka qoran waxaa ka mid noqon doona tilmaamo iyo wakhtiga kama danbeysta ah ee rafcaanka.

**Wixii macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan muuqaal tusaale (oo ku qoran Ingiriis iyo Isbaanish) oo ku saabsan dacwad dhegeysiga yo su'aalaha badan oo inta badan la is weydiiyo, ka booqo websaydkeena barta**

**www.oah.wa.gov**

**Haddii aad qabto wax su'aalo ah, wac: (800) 366-0955**

## Su'aalaha uu Garsooruhu kugu weydiin karo Goobta Dacwad Dhageysiga

U diyaargarow inaad ka jawaabto su'aalahan markaad joogto goobta dacwad dhegeysigaaga haddii ay khuseeyaan kiiskaaga.

Dhammaan kiisaska, haddii aad tahay dacwoodaha:

- Goorma ayaad bilawday u xaraynta sheegashooyinka si todobaadle ah dheefaha shaqo la'aanta?
- Goormaad joojisay u xaraynta sheegashooyinka si toddobaadle ah?
- Markaad u xaraynaysay si toddobaadle ah, miyaad:
    - jidh ahaan awooday inaad shaqeeyso?
    - diyaar u ahayd shaqo iyada oo aan wax xaddidaad ah uusan lahayn wakhtigaaga?
    - si firfircoon u raadisay shaqo?
- Haddii aadan awoodin ama aadan diyaar u ahayn inaad shaqeyso, maxay tahay taariikhaha ama saacadaha maalinta oo aadan awoodin ama aadan diyaar u ahayn inaad shaqeyso?
- Maxaad u awoodi wayday ama aad diyaar ugu noqon wayday inaad shaqeyso taariikhahaas ama saacadahaas?
- Haddii aadan shaqo raadinynin, maxaa diiday inaad sidaas sameyso?

Haddii kiiskaagu uu ku lug leeyahay shaqo ka saarid (shaqo ka tagid, ka eryid, ama shaqada ka fiijin/saarid):

- Maxay ahaayeen taariikhaha bilaabida iyo dhammaanshaha ee shaqada?
- Sidee eby shaqadu ku dhamaatay?
- Haddi aad tahay dacwoodihii oo aad shaqada ka tagtay, maxaad uga tagtay shaqada?
- Haddii aad tahay loo-shaqeeyaha oo aad fiijisay dacwoodaha, maxaad u fiijisay dacwoodaha?

Kiisaska halkaas oo dheefaha loo dhimay sabab ah helitaanka dakhli ah nooc ka mid ah:

- Maxay ahaayeen cadadka saxda ah ee aad kasbatay ama mushahar ahaan laguu siiyay usbuuc kasta oo aad u xeraysay sheegashooyinka si toddobaadle ah dheefooyinka shaqo la'aanta?
- *Isku soo aruurso jeegaga lacag bixinada ama dukumentiyada kale ee muujinaya cadadkan. Waxaad u soo gudbin kartaa garsooraha iyo dhinacyada kale ka hor taariikhda dacwad dhagaysiga, adoo isticmaalaya tilmaamaha ku qoran bogga 2.*

Kiisaska ku lug leh codsigaaga inaad iska dhaafto lacag-bixin dheeraad ah:

- Waa maxay kharashyada faahfaahsan iyo dakhliga billaha ah ee dhammaan xubnaha qoyskaaga?
- Waa maxay deymaha lagugu leeyahay iyo hantida aad leedahay?
- Ma jiraa wax kale oo kaa dhigi kara iney dhibaato kugu noqoto dhaqaale ahaan inaad dib u bixiso lacagta dheeraadka ah?
- *U diyaarso qoraalo ama dukumeentiyo dacwad dhageysigaaga si aad u siiso macluumaad sax ah oo dhamaystiran garsooraha.*

## Matalaada

Waxaa laga yaabaa inaad adigu isu matasho dacwad dhageysigaaga, ama waxaad weydiisan kartaa qof kale inuu ku matalo. Inta badan dadka ka qayb gala dacwad dhegaysiyada shaqo la'aanta ayagaa isku metelaya dacwad-dhageysiga.

**Waad is-matali kartaa ama soo wici kartaa si aad u hesho macluumaad ku saabsan caawimaad sharci oo bilaash ah.**

Habka dacwad dhageysiga waxaa loo qaabeeyey si loogu ogolaado dadka inay is-matalaan.

Haddii qof kale ku matalo, waxay ka jawaabi doonaan su'aalaha sharciga iyo midka habraaca waxayna kuu samayn doonaan dood sharciga ku saleysan. Wakiilkaagu kuma markhaati furi karo isagoo adiga ku matalaaya oo qofna uma turjumi karo.

Ma aha in wakiilkaagu uu noqdo qareen. Saaxiib ama xubin ka tirsan qoyska ayaa ku matali kara.

Waxaad sidoo kale shaqaaleysiisan kartaa qareen. Waa inaad adigu shaqaaleysiisataa qareenkaas. Gobolku ma bixin doono kharashka qareenkaaga.

## Kheyraadka/Agabyada:

Hay'adaha qaarkood waxay bixiyaan adeegyo sharci oo bilaash ah ama kuwo qiimo jaban.
Haddii aad xiisaynayso, halkan waxaa ku qoran qaar ka mid ah kheyraadka/agabyada aad la xidhiidhi karto si aad u hesho caawinaad:

| Magaca Kheyraadka/Agabka | Lambarka Telefoonka | Websaydka |
|---|---|---|
| Mashruuca Sharciga Shaqo La'aanta<br><br>(Matalaad sharci oo bilaash ah. Turjubaano bilaash ah ayaa la bixiyaa) | (888) 441-9178<br><br>Iimaylka: info@ulproject.org | https://unemploymentlawproject.org |
| Barnaamijka Isku-dubbaridan ee Waxbarashada Sharciga ah, Talo-siinta, iyo Gudbinta (Coordinated Legal Education, Advice, and Referral program, CLEAR)<br>(Northwest Justice Project (Mashruuca Cadaaladda ee Waqooyi Galbeed)) | (888) 201-1014 | https://www.washingtonlawhelp.org |
| Washington State Bar Association (Ururka Qareenada ee Gobolka Washington) | (800) 945-9722 | https://www.wsba.org/for-the-public/find-legal-help |